

# **Adigu si fiican ayaa aad u ogtahay in aad xaq u leedahay hal qof oo ku taageera**

Hal xaaladda oo adag gudaheed dadka badankood  
waxa ay u baahan yihiiin in ay qof kala hadlaan



**REGION  
DALARNA**

## **Waa kuma qofka heli kara qofka taageeraya?**

Waa adigaagan lagu daryelley iyada oo la raacaayo:

- Xeerka ku saabsan qasab ku daryeelidda (LPT).
- Xeerka ku saabsan xaqa daryeelka dhimirka (LRV).
- Xeerka ilaalinta cudurada faafa (SML).

Daryeelku waa in uu adiga ku ogeeysiyyaa xuquuqda aad u leedahay inaad hesho hal qof oo ku taageera adiga, waana adiga qofka go'aan ka gaadh naftaada haddii aad adigu rabto qof ku taageera.

Wax lacag ah kuguma fadhidoo inaad hesho qof ku taageera.

Adigu waxa aad xaq u leedahay qof ku caawiya inta lagu jiro daryeelka khasabka ah ee socda iyo afar toddobaad kadib, waase haddii aad adiga iyo qofka ku taageerta aad isku raacdaan taas.

## **Waa maxay waxa uu qofka adiga ku taageerayaa uu qaban karo?**

- In uu noqdo qof aadane ah oo daneynaya in uu halkaas u joogo si uu kuu taageero. Qof aad la hadli karto oo gebi ahaanba ka madax bannaan daryeelka.
- In uu kugu soo booqo waaxda ama meesha aad adigu joogto. Sidaas oo kale waxa aad idinku is kula xiriiri kartaan dhanka taleefanka ama xiriir kale oo digitaal ah.
- In uu kaala qayb qaadan karo wada xaa joodka maxkamadda maamulka, haddii aad rabto.
- Qofka taakulaynta ah waxaa saaran waajibka xog qarinta, taas oo macnaheedu yahay in qofka taakuleynta ah uusan qofna u sheegi doonin waxa adiga kugu saabsan inaad adiga u ogolaato mooyaanee.

## **Waa maxay waxa la gudboon qofka taageerada ah in uusan sameyn?**

- In uu ka qayb qaato daryeelkaaga iyo daaweyntaada.
- In uu mas'uul ka noqo adiga dhaqaalahaaga.
- Inuu adiga wakiil xagga sharciga kuu noqdo.

## **Sideed baad sameeynaysaa si aad u hesho adiga qof ku taageera?**

Kala hadal qofka aad adigu la xiriirto, daaweyahaaga ama dhakhtarka markaas ayay adiga kaa caawinayaan in aad la xiriirto guddiga bukaanka ee magacaabaya qof taageeraha ah.



Haddii aad adigu qabtid su'aalo ku saabsan qofka taageerada ah, waxa aad adigu la hadli kartaa shaqaalaha jooga qaybta ama waxa aad la xiriiri kartaa guddiga bukaanka.

**Cinwaanka Boostada:**

Box 712  
791 29 Falun

**Cinwaanka booqashada:**

Regionkontoret  
Vasagatan 27  
Falun

**Taleefanka:**

023-49 01 00

**E-dhammbaal:**

[patientnamnden@regiondalarna.se](mailto:patientnamnden@regiondalarna.se)

**Bogga internetka ee gobolka:**

[www.regiondalarna.se/patientnamnden](http://www.regiondalarna.se/patientnamnden)